

Saddex siyaasado caymis oo muhiim ah in la yeesho.

U dooro ICA Försäkring caymis wanaagsan oo la awoodi karo. Tani waa sababta aan u nahay shirkadda caymiska ee ugu kobaca badan Iswiidhan ee macaamiisha.

Caymiska guriga

Haddii aad qaadato hal siyaasad caymis oo keliya, waxay u badan tahay inay tahay caymiska guriga. Waa caymiska aasaasiga ah ee qoyska kaas oo daboolaya dhowr meelood oo muhiim ah. Tusaale ahaan, waxay ilaalinaysaa gurigaaga, alaabtaada iyo qof kasta oo halkaas ku nool marka aad maqan tahay. Waxaad codsan kartaa caymiska guriga haddii ay dhacdo in gurigaaga la jabsado, dacwad iyo jirro/shil dibadda ah ama haddii baaskiilkaaga la xado, tusaale ahaan. Caymiska guriga ee ICA wuxuu bixiyaa ilaalinta aasaasiga ah ee ugu wanaagsan dhammaan, sida uu qabo Konsumenternas.se

Waxaad arki kartaa qiimahaaga ood si toos ah wax uga iibsan kartaa onlayn halkan.

Caymiska baabuurta

Haddii aad baabuur leedahay, sharci ahaan waa inaad gasho caymiska baabuurta. Waxaad kala dooran kartaa saddex heer oo caymis ah: qolo saddexaad, qayb iyo mid buuxda. Iyadoo lala joogo ICA, waxaad ku heli kartaa xasilloonida maskaxda in kharashku aanu kordhi doonin, maadaama qiimaha caymiska baabuurkeena uu go'an yahay. Tani waxay ka dhigan tahay haddii aadan sameynin cabasho, waxaan ballanqaadeynaa inaan kordhin qiimaha ilaa shan sano. Miyay kula fiicantahay?

Waxaad arki kartaa qiimahaaga ood si toos ah wax uga iibsan kartaa onlayn halkan.

Caymiska shilka

Si loo ilaaliyo dhammaan xubnaha qoyskaaga dhaqaale ahaan, waa fikrad wanaagsan inaad galiso caymiska shilalka qoyska oo dhan. Taas macneheedu waxa weeye in aad heli karto magdhowga dharka waxyeeloobay, dhaawaca ilkaha ama naafanimada jidhka, tusaale ahaan, haddii ay dhacdo shil degdeg ah. shaqeeya saacad walba kana shaqaynayo aduunka oo dhan. Intaa anaga nala joogto, waxaad helaysaa qiimo wanaagsan oo dheeraad ah markaad caymiso qoyska oo dhan.

Waxaad arki kartaa qiimahaaga ood si toos ah wax uga iibsan kartaa onlayn halkan.